



## Jadwalka iyo Liiska Hubinta Is-caawinta

Isticmaal liiskan hubinta si aad u samaysid jadwal maalin kasta ah ee wanaagsan kasoo canugaaga ka caawin kara in uu dugsiga isku diyaariyo.

### HURDADA

- Canugayga waxaa uu soo kacaa isla waqtigii maalin walba.
- Canugayga waxaa uu leeyahay fursada maalintii si uu si deganaan leh u ciyaaro ama inuu seexo.
- Canugayga waxaa uu leeyahay jadwal oo seexasho ah oo waxaana si joogto ah hurdo u qabataa habeenka si fudud.
- Canugayga waxaa uu seexdaa ugu yaraan 10 saacadood int badan habeenada.

### CUNTADDA

- Canugayga waxaa uu cunnaa quraac caafimaad leh subax walba. (**Hagaha Cuntadda Canada** ayaa kaa caawin kara inaad u samaysid xulashooyin oo caafimaad leh.)
- Canugayga waxaa uu cunnaa saddex cunto iyo labba cunto fudud maalin walba.

### CIYAARTA

- Canugayga waxaa uu jir ahaan firfircoon yahay saddex saacadood maalintiiba. (Hawlaha sida orodka iyo ku ciyaarista barxadaha ayaa ka caawin kara in uu jirkooda xoog yeesho oo caafimaadna leh iyo sidoo kale waxaa uu ka caawin karaa maalinta oo dhan iyo in ay si caafimaad leh u seexdaan habeenkii.)
- Canugayga maalintiiba ma lahan wax ka badan hal saac oo daawasho dhalo ah (Telefishan, kombuyuutar ama fidiyow).

### LUUQADDA

- Canugayga waxaa uu qof weyn weydiisan karaa kaalmo. (haddii canugaada uu ka baranaayo dugsiga luuqad cusub, waxaa kaalmo ah in aad bartid ereyo yar oo muhiim ah ama weedho, sida: fadlan i caawi, musqasha, biyo, gaajo, xanuun.)

- Canugayga waxaa uu dadka kale u sheegi karaa hawlahooda, dalxiiskooda ama dhacdada ee afkiisa hooyo.

## BADBAADADA

- Canugayga waxaa uu yaqaanaa si amaan ah in wadada loo qooyo isagoo la socda qof weyn (tusaale., waxaa uu yaqanaa in la sugo oo gacanta la qabto qofka weyn ka hor inta aan wadada la qoynin).
- Canugayga waxaa uu yaqanaa sida loo tago dugsiga looguna soo laabto.
- Canugayga waxaa uu yaqanaa dugsiga, barxada iyo xaafada.

## IS-CAAWIN

- Canugayga waxaa uu garanayaa sida uu keligiisa dhar u gashto (haddii laga reebo galuusyada mooyee, zinyeeriga iyo tayga) Ogoow: Tani waxay u badan tahay afar- ama shan sano jir.
- Canugayga waxaa uu aadi karaa musqusha isagoo aan la kaalmaynin ama kaalmo yar.
- Canugayga waxaa uu garanayaa si gacmaha loo dhaqdo.
- Canugayga waxaa uu furi kraa oo haddana xiri karaa sanduuqa qadada ama cuntada fudud.

## QIBRADA DADKA KALE

- Canugayga waxaa uu qibrad u leeyahay inaan ka maqnaado oo lagu aamino dadka waaweyn oo aan goyska ka mid ahayn.

Inaad ka caawisid canugaada inay bartaan meelaha kale iyo dadka kale ka hor inta aysan bilaabin dugsiga.

1. Aad barnaamijyada loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta yaryar.
2. Aad maktabadaada degaanka, xarunta madadaalada ama xarunta saaxiibada.
3. Saaxiib ka codso in uu kuu ilaaliyo canugaada waqti gaaban.
4. Canugaaga u kaxeey barxadaha, matxafka, dukaanka qudaarta ama raacisa baska.
5. Soo fiiri dugsigaada deegaanka haddii ay bixiyaan barnaamijka udiyaargarowga iskuulka ama booqo xanaanada ka hor inta aan iskuulka bilaaban.

Waa iska caadi haddii aan saxi karin sanduuqyada dhammaan. (Taasi macnaheedu ma ahan in canugaadu aan diyaar u ahayn iskuulka.) Waqti ku qaado in aan jadwalada u diyaariso oo aadna ku tababaratiid xirfadaha is-caawinta iyo badbaadada.

Waxaa laga soo guuriyay Best Start Resource Center iyadoo la ogolyahay.

Booqo [cmascanada.ca/cnc/parents](http://cmascanada.ca/cnc/parents) wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada